

HEL QORSHE CAYMIS CAAFIMAAD OO ADIGA KUGU HABOON.

Is-barbardhig qorshayaasha tayada leh, hel fursado aad lacag ku kaydsan karto, oo hel caawimaad bilaash ah oo ka timaada takhasusle kaa caawinaya inaad hesho caymis kugu haboon.

5 ARIMOOD EE UGU MUHIIMSAN EE LAGA OGAADO DIIWAANGELINTA FURAN

1. **WAKHTIGA: Noofeembar 1 - Janaayo 15.** Is-diiwaangeli ugu dambayn 15 Diseembar si aad u hesho caymis bilaabanaya Janaayo 1. Maalinta ugu dambaysa ee is-diiwaangelinta waa 15 Janaayo, si loo helo caymiska bilaabmaya bisha Febraayo 1.
2. **GOOBTA: CoverME.gov** waa Suuqa Caymiska Caafimaadka ee rasmiga ah ee Maine—waana meesha kaliya ee laga heli karo Maine gunnooyinka canshuurta ee federaalka, kuwaas oo yareeya kharashka caymiska caafimaadka. In ka badan 70% dadka hadda is-diiwaangeliyay ayaa u qalma dhimista canshuurta ee heer federaal, iyadoo qoyskiiba uu celcelis ahaan kaydsanayo $769 bishii.
3. **WAA MAXAY: Caymis tayo leh, oo dhamaystiran.** Dhamaan qorshayaasha **CoverME.gov** waxaa ka mid ah Dheefaha Caafimaadka Muhiimka ah sida adeegyada caafimaadka dhaqanka, daryeelka hooyada, caymiska daawada dhakhtarku qoro, iyo isbitaal dhigista. Laga bilaabo 2027, qorshayaasha Doorasho Qeexan waxay daboolaan daryeel maalinle ah oo dheeraad ah *ka hor intaadan buuxin lacagta lagaa jaro*, oo ay ku jiraan daryeelka aasaasiga ah, booqashooyinka caafimaadka dabeecadda, daryeelka degdegga ah, daawooyinka guud, iyo waxyaabo kale.
4. **SABAB: Hel qiimaha kugu haboon.** Lacagta caymiska ee ugu hoosaysaa mar walba macnaheedu ma aha kharashka guud ee ugu hooseeya. Is-barbardhig khidmadaha caymiska, lacagaha la jaro, adeegyada la daboolay, daawooyinka dhakhtarku qoro, iyo shabakadaha daryeel bixiyeyaasha, si aad u hesho qorshe ku haboon baahiyahaaga gaarka ah ee daryeelka caafimaadka iyo miisaaniyaddaada.
5. **SIDEE: Hel caawimaad takhasusle, oo lacag la'aan ah.** Uma baahnid inaad keligaa xal u hesho. Dilaaliinta shahaadada haysta iyo Kaaliyeyaasha Diiwaangelinta Maine ayaa diyaar u ah inay kaa caawiyaan inaad fahamto fursadahaaga, aad hesho keydinta maaliyadeed, iyo inaad iska diiwaangeliso caymiska—dhamaantood lacag la'aan. Booqo **CoverME.gov/localhelp** si aad ula xiriirto dilaal ama kaaliye, iska diiwaangeli onlaynka barta **CoverME.gov**, ama wac **1-866-636-0355** TTY: 711. Luuqadaha aan Ingiriisiga ahayn, dooro ikhtiyaarka 4.

HA HILMAAMIN: Inaad isdiiwaangaliso ugu dambayn **Diseembar 15** caymiska bilaabanaya bisha Janaayo 1. Wakhtiga ugu dambeeya ee is-diiwaangelinta waa **Janaayo 15** ee caymiska bilaabanaya bisha Febraayo 1.

coverME.gov
AFFORDABLE HEALTH COVERAGE FOR MAINE

CoverME.gov | 1-866-636-0355 TTY: 711